Siyaasadda BDFH- Wadashaqaynta Guddiga Dugsigga

Dugsi kasta waxaa ahaan doona guddi dugsiga oo wada shaqaynaya ayna ku jiraan dad matalaya waalidiinta, bulshada, kuliyada, maamuleyaasha iyo shaqaalaha sirta ah.

Ujeedooyinka iyo Xadka: Ujeedooyinka iyo xadka uu leeyahay guddiga wadashaqaynta dugsigga waxay noqon doontaa:

In kor loo qaado guul gaarida ardayga iyo jawiga dugsiga ayada oo si wadajir ah loola shaqaynayo bulshada dugsiga loona bixinayo dadaalo ku caawinaya dugsiga iyo Degmada ujeedooyinkooda.

in lasameeyo jihayn habaysan oo caawinaysa ujeedada dugsiga iyo aragtidiisa sida lagu sheegay gudaha Qorshaha Horumarinta dugsiga (SIP).Qorshaha horumarinta dugsiga (SIP), oo uu la socdo barnaamijka qorshaha dugsiga, waa in ay u adeegaan sida qorshaha istiraatiijiga ee dugsiga.

In loo hoggaansamo qaanuunka gobolka iyo kan dowladda dhexe, xeerarka Qaybta Waxbarashada ee Colorado,amarada ladabakhi karo ee Maxkamada Degmada Mareykanka, qorshaha ficilka Degmada La oggolaaday, Oggolaanshaha DPS/DCTA, iyo qandaraasyo kale iyo waajibaadka Degmada.

Kulamada lala kulmayo guddiga wada shaqaynta dugsiga wuxuu ahaan doonaa mid u furan dadweynaha. Xayaysiinta kulamadaan waxaa lagu soo dhejin doonaa boosaska dadweynaha munaasabka ah. Nuqul qorshaha ku saabsan ayaa si baahsan loo soo dhejin doonaa waxaana laga dhigi doonaa mid dadka oo dhan ay heli karaan maalinta shaqaynta kahor kulanka iyo daqiiqadaha laga bilaabo kulanka ayaa sidoo kale si baahsan loo soo dhejin doonaa wuxuuna ahaan doonaa mid dadka oo dhan ay wada heli karaan.

Kulanka wadashaqaynta dugsigu wuxuu:

la shaqayn doonaa beesha dugsiga taasi oo ka kooban dhismaha maamulaha, macalimiinta, shaqaalaha, ardayda, waalidiinta, shacabka iyo hoggaamiyayaal ganacsi,adeeg iyo dad matala deriska, iyo xubno kale oo beesha ka tirsan;

xooga saari doonaa qorshaha horumarinta dugsiga SIP maadaama ayadu ay tahay mas'uuliyada aasaasiga ka ah dugsiga;

isticmaali doonaa qiyaas labo laab ah wuxuuna isku hagaajinayaa ilaha waxtarka si uu u caawiyo SIP iyo barnaamijka qorshaha dugsiga;

wuxuu bixin doonaa hoggaan, qiimayn iyo oggolaansho loogu talagalay qorshaha horumarinta dugsiga SIP;

wuxuu bixin doonaa hoggaan, qiimayn iyo oggolaansho loogu talagalay miisaaniyada sannadlaha ah ee dugsiga si loo hubsado waafaqsanaanteeda qorshaha horumarinta dugsiga SIP iyo barnaamijka qorshaha dugsiga ;

u dhaqmi doonaa sida Guddiga Mas'uuliyada iyo Horumarinta Dugsiga (SIAC) ee dhismaha ;

Dhisi doonaa xariiryo uu la yeesho waalidiinta, xubnaha beesha, shacabka, adeegga iyo ururada deriska ah si uu u kordhiyo ka qaybqaadashada dugsiga una sameeyo gole ay ka qaybqaataan bulshada ;

ubixiyo hoggaan, qiimayn, iyo oggolaansho loogu talagalay isticmaalka meelaha shaqaaluhu leeyihiin oo ay Degmadu diyaarisay maadaama ay la xariirto qorshaha horumarinta dugsiga SIP, miisaaniyada dugsiga, iyo barnaamijka qorshaha dugsiga, oo ay ku jirto la talin khuseysa haggaajin la samayn karo ku waajib yeelida mawduucyada tira koobka ardayda darteeda;

kaqayb qaadan doonaa hawsha uu maamulaha-soo doortay ayada oo wareysi lala yeelanayo musharaxiinta iyo murashaxiinta uu ku talinayo maareeyaha ;

ka qaybqaadan doonaa qiimaynta sannadlaha ah ee maamulaha ayaga oo la siinayo ka qayb qaadashada arrimaha ku lugta leh maamulaha ee la xariira kuna caawiyaan hawsha guddiga wadashaqaynta ;

dib u hubin doonaa, halka ay munaasabka tahayna oggolaan doona nidaam hawleedyada anshaxa iyo ammaanka;

dib u hubin doonaa, halka ay munaasabka tahayna, muraajaco ku samayn doona jadwalka taariikhda iyo/ama jadwalka xiisooyinka;

samayn doonaa talooyin khuseeya wax kasta oo isbedel ah oo ku yimaada qorshaha dugsiga ee Guddiga Waxbarashada Degmada tooska dhismaha maamulaha.

Guddiga wadashaqaynta dugsiga ma ahaan doono:

mid ka qaybqaata hawlaha maalin-laha-ah ee dugsiga;

kuma lug lahaan doono mawduucyada la xariira dadka kalida ah (shaqaalaha, ardayda, ama waalidiinta) dugsiga jooga;

ma noqon doono mid ku lug leh mawduucyada shakhsiga ah (Guddiga Shaqaalaha Dugsiga wuxuu yahay mid si gooni ah ugu taagan qandaraaska hada ah DPS/DCTA).

Qeexitaano

Qiyaasaha Labo laabka ah: Kuwan waa calaamado ay dejisay-Degmadu laguna oggaanayo qofka dugsiga dhigta waxqabadkiisa iyo macluumaad meelahaan soo socda ku saabsan:

imaatinka, darajada-qalinjebinta,hoggaaminta dugsiga, heerka waxbarasho, ixtiraamka ardayga, ammaanka dugsiga, iyo qiyaasooyinka kale sida Darajada Mas'uuliyada Dugsiga (SAR).

Barnaamijka Qorshaha Dugsiga: Barnaamijyada qorshaha dugsiga ee ku caawisa dugsiga iyo Degmada ujeedooyinkooda in ay gaaraan iyo barnaamijka sida isku habaynta adeegaha la talinta, ku darida doorashada/fasalada gaarka ah, iyo hawlaha aan-manhajka ku jirin.Tan kuma jirto barnaamijka waajibka ku ah-Degmada ama Waxbarashada Goonida ah.

Jadwalada Dugsiga: Kuma jirto horumarinta jadwalka aasaasiga ah ama haggaajino lagu sameeyay jadwalka maalin laha ah ee loogu talagalay barnaamijka ama xaaladaha khaaska ah. Waxaa ku jira kara jadwaleynta mawduucyada u dhaca qaab sannadle ah.

Kaleendariyaha Dugsiga: Kaleendariyaha ama jadwalka taariikhda sannadlaha ahi waxaa aasaasay Degmada, si kastaba, dhacdooyinka gaarka ah sida Ku laabashada-Dugsiga Habeenkii ah iyo soo- qaadashada kaararka warbixinta waxaa laga dejin karaa guddiga wadashaqaynta dugsiga xagiisa ayada oo u samaysan qaab sannadla ah.

Qorshaha Dugsiga: Nooca guud ee uu dugsiga u adeegsado waxbarida ardaydiisa, waa sida K-8, Montessori-waa nidaam ama qaab waxbarasho waxaana loo bixiyay magaca dhakhtaradii aasaastay -, ama kaleendariyaha dib u habayn lagu sameeyay.

Nidaam hawleedyada La raaco: Maareeyaha ayaa ogaysiin doona xeerarka lagama maarmaanka u ah fulinta siyaasaddan.

La ansixiyay 24 Abriil, 2003